

Sida Mashruuca Taageerida Dhibanahu caawimo u bixiyaan

Haddii aad u malaynaysid in dhibaato kaa soo gaadhay dambi ama dhacdo midabtakoor, Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhaha aya caawimo bixin kara. Uma baahnid inaad booliiska ka wargalisid wixii dhacay. Adeegyadaydu waa lacag la'aan, sirina ku dheehan tahay una furan dhammaan qaybaha beesha oo dhan.

Dambi midabtakoor/dhacdo waxay noqon kartaa mid mar kaliya dhacda, ama waxay noqon kartaa dhibaateyn joogto ah oo muddo waqtiya socota. Waxa adiga ama qoyskaaga soo gaadhay waxaa laga yaabaa iney ku jiraan cunsuriyad:

- Caayid
- Baqdin galina
- Darbi erayo xun ku qora
- Dhaawac hantiyeedah
- Maagida
- Gacan ka hadla

Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhahu waxa u rumaysan yahay iney muhiim tahay adigu wixii dhacay sidaad u aragtid. Waxaana ogsoonahay waxyeelooyinku kuwo muddo waqtiya socda iney yihiin, gaar ahaan haddii si noqnoqosho ah aad u tabaalowday.

Waxaad si dhakhso ah caawimo uga heli kartaa Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhaha ka dib dambiga, ama waqti ka dambeeya. Waxaanu caawimo ku fidinaa:

- Mashaariicda Taageerida Dhib Soo gaadhaha ee beeshaada
- Adeegyada Marage ee xarumaha Maxkamada Sare (Crown Court) iyo

Maxkamadaha Dhexe (Magistrates' Courts).

- Khadka tilifoon ee Mashaariicda Taageerida Dhib Soo gaadhaha, adeegayaga tilifoonka.

Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhahu waxay bixiyaan taageerid nafsiyadeed, warar iyo caawimo waxqabad gacmeed ah.

Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhahahu waa hay'ad qaran oo samafal oo loogu talo galay dhibi soo gaadhayaasha dambiyeed. Waxaanu kale oo u shaqeynaa xuquuqda dhibi soo gaadhayaasha, maragyada iyo qoysaskooda, iyo baraarujin balaadhan oo waxyeelada dambiyada ah. Sanad walba Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhayaashu waxay caawimo u fidisaa dad ka badan hal milyan oo waxyeelo dambi kasoo gaadhay.

Shaqalahayagu iyo tabarucayaashayadu (volunteers) waxay aqoonsan yihiin inaad qof jira tahay, taasina tahay in cid kastaa siyaabo kala duwan u dhaqmaan.

Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhaha waxay qofka siiyaan kalsooni markaay la hadlayaan. Tabarucayaashayadu waxa dadka ku soo booqdaan guryahooda ama ku arkaan meel kale. Haddii aanaan haysan qof luqadaada ku hadla waxaanu ku dadaalaynaa inaanu afceliye kuu diyaarin doono.

Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhahu waxa uu war kaa siin karaa booliiska, hababka maxkamadaha u shaqeynaa iyo, haddii loo baahdana kuu diyaarin karaan tabarucayaashu iney saldhiga booliiska iyo maxkamada kuu raacaan.

Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhahu waxay xidhiidh iyaga oo ku matalaaya kuugu samayn karaan ururada kale, sida booliiska iyo waaxaha guryaha oo kale.

Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhahu waxay kugu xidhi karaan oo kale meelo caawimo gacmeed aad ka heli kartid oo kale, sida caawin dayactirida, haggajinta nabadgelyada iyo tirtirida waxa xun ee darbiyada lagu qoro.

Dil

Shaqaalahayaga iyo tabarucayaashayadu waxay u tababarsan yihiin iney caawiyaan kuwa iyagu ku sugan xaaladan xun. Dad dhib soo gaaray ayaa sanad walba gacansiintayada hela.

Magdhaw

Dhib soo gaadhayaasha gacan ka hadal/dagaal waxa laga yaabaa iney magdhaw dhaawaca soo gaadhay awgeed ka helaan Maamulka Magbixinta dhaawacyada dambiyada (Criminal Injuries Compensation Authority). Mashruuca Dhib Soo gaadhuu waxay kuu fidin karaan warar dheeraada iyo caawimo sidii magdhaw loo codsan lahaa.

Caawimo maxkamada ah

Haddii arinkaagu maxkamad tagayo, Adeega Marragga ee Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhaha - ee xarumaha Maxkamada boqortooyada iyo Maxkamadaha hoose ee tiradoodu kobcayso ku yaal - waxaa taageero iyo warar ku saabsan hababka maxkamadu u shaqeyso siinayaan adiga iyo qoyskaaga.

Sidaad ula xidhiidhi lahayd Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhaha

Waxaad si toosa qof ahaan ula xidhiidhi kartaa Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhaha xitaa haddii aanad jecleyn inaad dambiga soo sheegtid.

Haddii aad dambiga booliiska gaadhsiisid waxay iyaguna kula soo xidhiidhiinayaan Mashruucaaga Taageerida Dhib Soo gaadhaha deegaankaaga.

Victim Supportline

08453030900

9 subaxnimo ilaa 9 habeenimo maalmaha la shaqeeyo

9 subaxnimo ilaa 7 habeenimo maalmaha Sabtida iyo Axada

9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo fasaxyada baanka (bank holidays)

PO Box 11431, London SW9 6ZH.

Tilifoonada af ingiriisi qudha ayaa hadda looga jawaabaa

Khadka tilifoonka ee Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhaha waa khadka qaranka ee dhibi soo gaadhayaasha iyo maragyada dambi. Shaqaale iyo tabarucayaal tababaran ayaa kaala hadli kara adeegyada jira ee Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhaha waxaana ay kugu xidhi karaan Mashruuca deegaankaaga ama Adeega Maragga.

Wixii faalooyin iyo cabashooyin ah

Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhahu waxay soo dhawaynayaan wixii faalooyin ka bixina adeegyadooda. Waxaa jira habka dacwooyinka loo maro oo toosa. Fadlan la xidhiidh Mashruuca Taageerida Dhib Soo gaadhaha ee deegaankaaga/Adeega Maraga ama Xafiiska Qaranka (ee bogga ugu dambeeya) wixii faahfaahin dheeraada.